

Faa'iidooyinka Caanaha Naasku u leeyihiin dhallaanka dhiciska ah



Cadaymuhu waxay soo jeedinayaan in dhallaanka dhiciska ah, caanaha naaska ee hooyadood ay yihiin nafaqada ugu muhiimsan uguna wax ku oolka badan ee loo heli karo.

Caanaha naaskaagu waxay leeyihiin door muhiim ah oo ka ilaalinaya caloosha ilmahaaga dhicis ka ah necrotising enterocolitis (cudur ku dhaca mindhicirka dhallaanka dhiciska ah), oo ah xaalad xumi oo xun. Waxay kaloo caawisaa maskaxdooda, habka difaaca jirka, indhaha iyo sambabaha. Carruurta dhiciska ah, caanaha naasku waxay la xiriiraan koritaan hagaagsan marka ilmuhu weynaado (koritaanka waxaa ku jira xirfadaha sida socodka, isuduwidada, hadalka).



Dhibic kastaa wa lagu xisaab- tamayaa

Mililitir kasta oo ah caanaha naaska hooyadood ayaa saameyn togan ku leh natiijooyinka dhallaanka aan weli gaarin.

Dhammaan dhallaanka, si kasta oo dhicis u yihiin ama aan caafimaad u qabin, waxay afka ka qaadan karaan dambarka hooyadooda (gaar ahaan caanaha hore ee naaska) afkooda.

Caanaha naaskaaga ayaa si gaar ah loogu talagalay ilmahaaga nafaqo ahaan, caafimaad ahaan mindhicirka iyo difaacajirka.

Gaarista go'aanka ah inaad ilmahaaga siiso caanaha naaska

Waxaa laga yaabaa inaad weli go'aansan sidaad u quudin lahayd muddada dheer, laakiin haddii ilmahaagu dhasho xilli hore waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad caanaha u listo iyaga wax yar ka dib marka ay dhashaan.

In kasta oo tani ay kugu noqon karto wax culus oo wax badan kuu ah inaad ka shaqeyso, umulisooyinka, kalkaaliyayaasha caafimaadka iyo khubarada quudinta ayaa diyaar u ah inay kula hadlaan oo ay kaa caawiyaan lisitaanka, kaydinta iyo inaad ilmahaaga siiso caanaha naaska. Buug-yarahaan waxaa loogu talagalay inuu kula wadaago qaar ka mid ah sayniska ka dambeeya faa'iidooyinka caanaha naaska u leeyihiin ilmaha dhiciska ah.

Goorma ayaan bilaabi karaa inaan ilmahaaga u liso caanaha naaska?

In kasta laga yaabo inaad dhasho wakhti hore, jidhkaagu wali wuu awoodaa inuu sameeyo caanaha naaska, laakiin naasahaagu waxay u baahan doonaan kicinta lisitaanka joogtada ah si loo bilaabo loona joogteeyo soosaarka caanaha naaska.

Lisitaanka naaska kahor intaanu ilmahaagu dhalan


Waxaad bilaabi kartaa inaad caanaha naaska u listo ilmahaaga xitaa ka hor intuuusan dhalan. Waa inaad tan kala hadashaa dhakhtarkaaga ama umulisada kahor intaad bilaabin maadama **lisitaanka naasaha ee dhalmada kahor ah kaliya la samayn karo markii la xaqiijiyo inaad ilmahaaga dhalayso saacadaha soo socda.**

Waxaad kala hadli kartaa tan kooxda umulisada iyo umulisooyinka si ay u taageeraan go'aankaaga.

- Lisitaanka naaska ee dhalmada kahor ah waxaa lagu sameyn karaa gacan ama iyadoo la adeegsan karo 'Mashiinka Naaska ee Dhakhsa ah'. Lisitaanka la isticmaalo gacanta ama bangareynta waxay ku dhiiri gelinaysaa naasahaaga inay yeeshaan caano xilliga dhalmada. Tani waxay ka dhigan tahay in caanaha naaskaagu ay ka mid noqon karaan daaweynta ugu horreysa (uguna muhiimsan) ee ilmahaagu helo.

Lisitaanka caanaha kadib markuu ilmahaagu dhasho

- Caddayntu waxay muujineysaa haddii aad caanaha **ku lisi karto 1-2 saacadood gudahood dhalashada ka dib**, cadadka caanuhu wuxuu ka badnaan doonaa labanlaab 7 maalmood gudahood (marka la barbar dhigo haddii aad sugeyso wixi ka dambeeya 2 saacadood ka dib dhalashada), iyo farqiigaani wuxuu soconayaa illaa ugu yaraan 4 toddobaad.



Inta jeer ee la lisayo:

- Marka ay suurta gal tahay inaad ilmahaaga la yeelato taabashada maqaar-ka-maqaarka ah waxay kaa caawin doontaa soo saarka caanaha.
- Ku talagal inaad listo caanaha **8 illaa 10 jeer 24-kii saacadood kasta**; Shaqaaluhu waxay kaa caawin karaan isticmaalka gacanta iyo bamgaraynta naaska labaduba.
- **Lisitaanka caanaha waqti habeen ah** waa muhiim maxaa yeelay taasi waa marka soo dareemada hormoonnada ay inta badan diyaar u yihiin inay kiciyaan soo saarka caanaha. In kasta oo caqabad leedahay waxay kaa caawin doonto aasaasida caano soo saarkaaga. Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad alarm/qambaleel ku xirato maaddaama caano-soo-saarka habeenkii uu muhiim yahay in laga caawiyo kicinta soo saarka caanaha.
- Waxay u muuqan kartaa wax laga xumaado marka caano aad u yar ay soo baxaan bilowga, laakiin kicintaani waxay muhiim u tahay helitaanka soosaarka caanaha naaska. **Dhibic kasta oo caanaha naaska ah waa muhiim waxayna ilmahaaga siisaa nafaqooyin muhiim ah.**

Kordhinta Caanaha Naaska:

Mararka qaarkood, iyadoo si joogto ah loo lisayo, ayaa laga yaabaa in soo saarka caanahaaga ay hoos u dhacdo. Xor ayaad u tahay inaad nagala hadasho arintan, laakiin sidoo kale waxaa jira waxyaabo aan kugula talinay inaad sameyso si ay kaaga caawiyaan kordhinta caanaha naaskaaga:

- Kordhinta xaddiga isku dhowaanshaha iyo istaabashada maqaar-ka-maqaarka ah ee aad la yeelanayso ilmahaaga (Shaqaalaha ayaa kaa caawin doona arintan).
- Inaad listo caanaha adigoo ag jooga ilmahaaga, ka fakaraya ilmahaaga, oo fiirinaya sawirrada ilmahaaga inta aad caanaha lisayso.
- Ku beddelashada maro muslin ah ama shay dhar ah ilmahaaga kugu soo dhawaaday. Way ku raaxeysan doonaan urtaada waxaadna taaban kartaa oo urin kartaa wax uu ilmahaagu agtiisa ku dhowaa markaad nuujineyso.
- Daryeelka naftaada adoo cabaya si aad uhesho fuuq, inaad sifiican wax u cuntid oo aad nasato markaad karto.
- Kordhinta soo noqnoqoshada isku dayga lisitaanka caanaha: iskuday gacan ku lisida iyo isticmaalka banka.
- Hubinta in mashiinka si fiican kuula egtahay. Waxaa jira gaashaamo cabbir kala duwan leh waxaadna weydiisan kartaa mid ka mid ah shaqaalaha inuu kaa caawiyo inaad hubiso inaad haysato midka saxda ah.

Caanaha Naas-nuujinta ee Deeq Kubixinta

Caanahaaga naaska ee cusub waa nafaqada ugu muhiimsan ee la bixiyo si loo ilaaliyo carruurta dhiciska ah. Meesha ay suurtagal tahay, waxaan iska ilaalinaa inaanu ilmaha dhiciska ah siino caano-booro ama caanaha miisaan aad u hooseeysa leh maadaama ay kordhin karto halista cudurada weyn oo mindhicirka ((NEC), Necrotising Enterocolitis), iyo sidoo kale dhibaatooyinka indhaha iyo sambabada. Waxaan sameyn doonaa wax walba oo aan awoodno si aan kaaga caawino inaad soo saarto caanaha naaskaaga si aad u siiso ilmahaaga, laakiin markii loo baahdo, tusaale inta cadadka caanuhu kuu sii kordhayo, iyadoo la isticmaalayo heshiiska aad nala gashay, waxaan siin doonnaa Caanaha Naas-nuujinta dhamaan Carruurta ku dhashay toddobaad ama ka hooseeya 1.5 kg. Caanaha Naas-nuujinta waa badeecad si heer sare ah loo nidaamiyay, oo la kululeeyey oo laga helay Bangiga Caanaha Naaska ee SouthWest Neonatal.

Fadlan eeg buug-yaraheena kale '**Deeqda Caanaha Naas-siinta**' iyo '**Caano bixintaada**' Si aad uga hesho talooyin wax ku ool ah oo ku saabsan farsamooyinka nuujinta iyo kaydinta caanaha.

Haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah oo xagga quudinta ah fadlan weydii umulisadaada ama kalkaalisada ilmahaaga inay la xiriirto Khabiirada Quudinta Ilmaha ee deegaankaaga.